

## Liisto-hubineedda Codsiga Meelaynta Aan Shatiga Haysan Unlicensed Placement Application Checklist

- Codsiga Daraasada Guriga Qoyska ee DCYF 10-354:** Gebi ahaan buuxi waxaadna ku dartaa macluumaadka xiriirka ee **seddex** qofood oo ka warbixin kara oo ay ka mid yihiin cinwaannada boostada iyo lambarada teleefoonka. Dadka kaa warbixinaya laba qof waa in aadan qaraabo ahayn, hal qofna waa in aad qaraabo tihiin, waxaadna qortaa dhammaan carruurta qaangaarada ah. Qoraha daraasada gurigaaga ayaa la xiriiri doona dadkan kaa warbixinaya.
- Oggolaanshaha Asalka (BAF), DSHS 09-653:** Qof kasta oo 16 sano jir ah ama ka weyn ee dhismaha ku nool waa in uu Soo gudbiyaa BAF oo uuna bixiyaa nuqul aqoonsi oo sawir leh. **Qaybta 2** ee ku taal foomka BAF waa gebi ahaanba la buuxiyaa. Marka BAF la helo, dhakhsiyaadka 18 sano jirka ah ama ka weyn iyo shakhsiyaadka 16 iyo 17 jirka ah ee ku soo noolaa meel ka baxsan Washington saddexdii sano ee ugu dambeysay waxay heli doonaan tilmaamo loogu talagalay ballanta qaadista sawirka faraha. **Ogow: Waxaad Ka buuxin kartaa BAF online-ka adiga oo booqanaya <https://fortress.wa.gov/dshs/bcs/>.** Linkigan wuxuu si wanaagsan ugu shaqeynayaa bogga laga dalacdo internet-ka ee Chrome.
  - Dhammaan foomamka BAF-yada laga buuxiyay baraha internet-ka, waxaa lagu siin doonaa lambar xaqiijin/aqoonsi kantarool. Waxaad macluumaadkaasi siisaa shaqaalaha daraaseynaya gurigaaga si uu uga baraandego.
- Qorshaha Daadgureynta Xaaladaha Deg-degga Ah ee DCYF, 16-204:** Fadlan buuxi ka-dibna saxiix.
- Waraqda Shaqada Dhaqaalaha, DCYF 14-452:** Fadlan ku soo lifaaq xaqiijinta dakhliga (tus. W-2s, gunta jeegga mushaarka, iwm.).
- Warbixinta Caafimaadka Codsadaha, DCYF 13-001:** Baaritaan jireed oo la sameeyay 12-kii bilood ee ugu dambeeyay gudahooda ayaa looga baahan yahay codsade kasta. Fadlan qaybta kore ee foomka ku qor xarfaha hore ee magacaaga ka-dibna saxiix waxaadna shaqaalaha daraaseynaya gurigaaga siisaa macluumaadka xiriirka ee bixiyaha adeegaagga caafimaad. Shaqaalaha daraasada guriga waa in uu si toos ah codsiga caafimaadka ugu diraa adeeg bixiyaha.
- Macluumaadka Shakhsiyeed, DCYF 15-276:** Looga baahan yahay codsade kasta.
- Nuqulka Rukhsada(Rukhsadaha) Daraawalka iyo Caymiska Gaariga:** Bixi nuqullada hadda ah ee loogu talagalay codsade kasta.
- Tallaalada Tdap ama DTap (Xiiqdheer/Qufac xiiqdheer) ee hadda ah** ee loogu talagalay dhammaan xubnaha reerka haddii la codsanayo in ay bixiyaan daryeelka loogu talagalay carruurta ay da'doodu ka yar tahay da'da laba sanno.

### XASUUSNOW:

1. In aad hal mar soo wada gudbiso dokumentiyadaada oo dhan ayaa gacan ka geysanaysa geeddi-socodka in uu si dhaqso ah oo aad u hufan u socdo balse sidoo kale annagana ma doonayno in aan ku daahno geeddi-socodka. Fadlan soo dir macluumaadka aad hayso kadibna waxaa kaa gala shaqayn doona shaqaalaha daraasada guriga in aad dhammeyso.
2. Foomamka kor ku qoran ayaa sidoo kale la heli karaa marka laga codsado shaqaalaha daraasada guriga. **Fadlan hayso nuqulka diiwaanadaada.**
3. Xirmadan waxaa ku jira **Baarista Ammaanka Reerka ee loogu talagalay Meelaynta Aan Rukhsada Lahayn DCYF 10-453.** Fadlan adeegso liisto-hubineedan si ay kaaga caawiso in aad gurigaaga u diyaariso baarista. **Shaqaalaha daraasada guriga** ayaa buuxin doona foomkan inta lagu guda jirro booqashadooda guriga.
4. Sidoo kale waxaynu ku boorinaynaa qaraabadeena in ay helaan daryeelka xanaanada rukhsadaysan. Fadlan ka eeg warqadda xaqiidka [Shati-bixinta Daryeelka Korsashada ee Qaraabada](#) dheefaha iyo macluumaadka ama shati-bixinta. Shaqaalaha daraasada guriga ayaa sidoo kale kaaga jawaabi kara su'aalo kasta ee laga yaabo in aad ka qabto noqoshada korsade shati haysta.
5. Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo geeddi-socodka daraasada guriga, fadlan la xiriir shaqaalaha daraasada gurigaaga ama la-taliyaha asaaga/qofka ku hawlan isku xirka.

**Waad ku mahadsantahay danaynta aad danaynayso in aad noqotid Kheyraad Meelayn!** Si aad wax badan uga oggaatid geeddi-socodka daraasada guriga ama si lagaaga caawiyo su'aalaha daraasada guriga fadlan kala xiriir:

- Fostering Together lambarkan 1-866-958-KIDS (5437) oo loogu talagalay dadka deggan galbeedka Washington ama
- Fostering Washington lambarkan 1-877-620-5748 oo loogu talagalay dadka deggan bariga Washington.
- Hay'adahan waxay taageerro iyo adeegyo siiyaan kheyraadka meelaynta qaraabada ah ama kale ee ku habboon.